# Warbixinta Korjoogtada Bulshada Rayidka ah ee Golaha Shacabka Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

**February 22 – March 12, 2025**

## 1. Hordhac

Warbixintan waxay iftiimineysa  xog-dhameystiran oo ku saabsan hawlaha korjoogteynta ee ay fulisay Xafiiska Bulshada Rayidka intii lagu guda jiray Kalfadhiga 6-aad ee Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya BJFS, kaas oo dhacay 22 Febraayo ilaa 12 Maarso 2025. Hawlahan kormeerku korjoogtada ah ayey wadeen in muddo ah bulshada rayidka iyadoo xoogga la saarayo hufnaanta, maamul-wanaagga dimuqraadiyadda, isla xisaabtanka dadweynaha, iyo hannaanka ka-qaybgalka balaaran e shacabka ee geeddi-socodka Golaha Shacabka BJFS.

Kalfadhigan muhiimka ah waxaa lagu faaqiday horumar sharci-dejin oo ballaaran oo ku saabsan horumarinta hannaanka hay'adaha, isla xisaabtanka maaliyadeed, dib-u-habaynta garsoorka, iyo horumarinta adeegyada caafimaadka dadweynaha. Kooxda korjoogtada bulshada rayidka, iyagoo gudanaya waajibaadkooda kormeer, waxay si dhow ula socdeen **toddobadii fadhi** ee Golaha Shacabka, waxayna si firfircoon ula shaqeeyeen daneeyayaasha iyo bulshada iyagoo faafinaya natiijooyinka kormeerkooda korjoogteynta fadhiyada dhamaan Golaha Shacabka BJFS.

## Ujeeddooyinka Warbixinta

2. **In la bixiyo** macluumaad ku saabsan tallaabooyinka sharci-dejinta iyo natiijooyinkooda.
3. **In la iftiimiyo** xoogagga habraacyada iyo in la aqoonsado caqabadaha jira.
4. **In la qeexo** waxqabadka iyo doorka kormeer ee bulshada rayidka.
5. **In la soo jeediyo** talooyin ku saleysan xogta la ururiyey si loo kordhiyo waxtarka iyo ka jawaabidda Golaha Shacbaka.

## 2. Sharciyadda Golaha Shacabka Ansixiyay

Kalfadhigii 6-aad ee Golaha Shacabka BJFS waxaa ku xoogana abaabulka dhaqdhaqaaq sharci-dejin oo xooggan, iyadoo la ansixiyey dhowr Hindise Sharciyeedyo oo muhiim u ah hoggaaminta, ammaanka, dib u habynta dhaqaalaha, iyo kuwa kale oo muhiim u ah dalka. Waxaa sidoo kale socday akhrisyo Hindise Sharciyeedyo iyo mooshinno lagama maarmaan u ah shaqada Baarlamaanka.

**Hindise Sharciyeedyo Muhiimka ah oo Golaha Shacab Ansixiyey**

- **Hindise Sharciyeedka Caddaaladda Dhallinyarada (10 Maarso 2025):**
- Waxey Golaha Shacabka ku ansixiyey taageero ballaaran (139 cod oggol, 2 diidmo). Xeerkan wuxuu wax ka qabanayaa dib-u-habaynta nidaamka caddaaladda dhallinyarada, isagoo ujeedkiisu yahay in la xaqiijiyo daaweyn cadaalad iyo insaaniyad leh oo loo helo dhallinyarada dambiyada gala.
- **Hindise Sharciyeedka Canshuurta Dakhliga (10 Maarso 2025):**
- Wuxu Golaha Shacabka taageeray aqlabiyad weyn (138 oggol, 2 diidmo, 1 ka aamuse). Xeerkan wuxuu soo bandhigayaa nidaam ka duwaan hannaankii hore ee lacag arruurinta ah oo canshuureed si loo xaqiijiyo sinnaanta maaliyadeed, hufnaanta, iyo kororka dakhliga dowladda ee horumarinta qaranka.
- **Hindise Sharciyeedka Ka-hortagga Lacag-dhaqidda & Maalgelinta Argagixisada (AML & CTF) (12 Maarso 2025):**
- Waxaa uu Golaha Shacabka ansixiyey iyadoo ay u codeeyeen 141 xildhibaan oo taageersan, taas oo muujineysa go’aanka adag ee Baarlamaanka ee la-dagaallanka dambiyada maaliyadeed iyo maalgelinta argagixisada, iyadoo la hirgelinayo nidaamyo adag oo sharciyeed.
- **Hindise Sharciyeedka Hay’adaha Maaliyadeed (12 Maarso 2025):**
- Waxaa si aqlabiyad ah loo meel mariyey (142 oggol, 1 ka aamuse). Hindise Sharciyeedkaan wuxuu dhisayaa heerar nidaamsan oo dhammeystiran oo lagu maareeyo bangiyada iyo adeegyada maaliyadeed ee dalka, isagoo si weyn u xoojinaya xasilloonida dhaqaalaha.
- **Hindise Sharciyeedka Shirkadaha Caymiska (12 Maarso 2025):**
- Waxaa ansixiyey 142 xildhibaan oo oggol, halka 1 xildhibaan uu diiday. Xeerkan wuxuu dhigaya nidaam cad oo lagu hago suuqyada caymiska ee dalka, isla markaana ilaalinaya xuquuqda macaamiisha.

**Hindise Sharciyeedka Weli La Dajinayo / Akhriska Ku Jira**

- **Hindise Sharciyeedka Caafimaadka Soomaaliyeed:**

- Waxaa la bilaabay 3 Maarso 2025, iyadoo looga gol leeyahay in la horumariyo kaabayaasha adeegga caafimaadka dalka. Weli wuxuu ku jiraa dib-u-eegis iyo la-tashi guddiyadeed.
- **Heshiiska Iskaashiga Garsoorka Soomaaliya & Turkiga:**
- Baarlamaanka waxaa loo soo gudbiyey 8 Maarso 2025, isagoo qeexaya iskaashi ku saabsan arrimaha garsoorka iyo wada shaqaynta sharciyeed ee labada dal. Waxaa la sugayaa faahfaahin iyo falanqeyn Baarlamaan.

**Mooshin Hay'adeed oo La Ansixiyey**

- **Mooshinka Xasaanadda & Safarka Xildhibaannada (3 Maarso 2025):**
- Si aqlabiyad leh ayaa loo ansixiyey. Mooshinkani wuxuu xoojinayaa madax-bannaanida sharci ee xildhibaannada, isagoo xaqiijinaya:
    - ilaalintooda sharci,
    - badqabka safarrada gobollada,
    - iyo u fududeynta in ay si toos ah ula kulmaan bulshada ay matalaan.

Tani waa talaabo muhiim u ah kor u qaadista madax-bannaanida sharci-dejinta iyo xiriirka xildhibaanka iyo shacabka.

## Hawlaha Kormeerka ee Bulshada Rayidka

Kooxda korjoogtada Bulshada Rayidka waxay si hufan oo joogto ah u kormeertay fadhi kasta oo Golaha Shacabka ah, iyagoo adeegsanaya habab qiimeyn oo adag si loo ogaado u hoggaansanaanta habraacyada, tayada ka-qaybgalka, hufnaanta codeynta, iyo waxtarka doodaha. Hawlaha la fuliyey waxaa ka mid ahaa:

- **Joogitaan joogto ah iyo dukumenteyn** dhammaan fadhiyada guud ee Baarlamaanka.
- **Soo saarista warbixinno iyo faafin dijitaal ah** iyadoo la adeegsanayo baraha bulshada iyo aaladaha warbixinta.
- **Diiwaan-gelinta natiijooyinka sharci-dejinta**, joogitaanka xildhibaannada, tayada doodaha, iyo habsami u socodka hawlaha Golaha Shacabka.

Bulshada Rayidka waxay u adeegeen sidii **xiriiriye muhiim ah** oo u dhexeeya Golaha Shacabka iyo muwaadiniinta, iyagoo kor u qaaday hufnaanta,isla xisaabtanka, iyo kalsoonida dadweynaha ee geeddi-socodka sharci-dejinta.

# 3. Soo Koobista Fadhiyada Baarlamaanka

**Fadhiga 1 aad (22 Febraayo 2025):**

Kooxda Korjoogtada Bulshada Rayidka Soomaaliyeed ee Golaha Shacabka BJFS waxay si joogto ah uga qeybgalayeen la socodka **toddoba (7) fadhi** oo kulamo muhiim ahaa ay yeesheen Golaha Shacabka intii u dhaxeysay 22 Febraayo ilaa 12 Maarso 2025. Fadhiyadu waxay ahaayeen kuwo muhiim u ah habraacyada sharci-dejinta iyo doodaha siyaasadeed ee dalka.

Waxaa si rasmi ah u furay Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud. Guddoomiyaha Golaha Shacabka BJFS Mudane. Aadan Maxamed Nur ayaa xusay mudnaanta sharci-dejinta oo ay ka mid yihiin dib-u-eegista Dastuurka, tallaabooyinka isla xisaabtanka, iyo dhammaystirka shuruucdii ka harsanaa kalfadhiyadii hore.

**Fadhiga 2 aad (1 Maarso 2025):**

Waxaa dib loo dhigay Xeerka Caddaaladda Dhallinyarada sababo la xiriira arrimo farsamo oo ku saabsan qorista. Waxaa horay loo soo bandhigay kadibna si aqlabiyad leh loo ansixiyey Mooshinka Xasaanadda iyo Safarka Xildhibaannada, oo adkeynaya ilaalinta xildhibaannada iyo arrimahooda amni.

**Fadhiga 3 aad (3 Maarso 2025):**

Waxaa la akhriyay Akhriska Koowaad ee Hindise Sharciyeed Caafimaadka Soomaaliyeed. (Somali medical bill) Dooddii ku saabsan mooshinka xasaanadda xildhibaannada ayaa la soo gebogebeeyey, iyadoo lagu adkeeyey muhiimada ilaalinta xildhibaanka iyo helitaanka bulshada uu matalo.

**Fadhiga 4 aad (5 Maarso 2025):**

Wasiirka Maaliyadda ayaa soo bandhigay akhriska koowaad ee xeerarka dhaqaalaha ee muhiimka ah (Xeerka Hay'adaha Maaliyadeed, Xeerka Shirkadaha Caymiska, iyo Xeerka Canshuurta Dakhliga). Wasiirku wuxuu xusay in la sameeyey la-tashiyo ballaaran oo loogu talagalay dib-u-habaynta dhaqaalaha iyo xasilloonida maaliyadeed.

**Fadhiga 5 aad (8 Maarso 2025):**

Waxaa la dhaariyey xildhibaan cusub oo matalaya Dowlad-Goboleedka Galmudug. Waxaa la qabtay akhrisyada labaad ee Hindise Sharciyeed ladagaalanka lacag dhaqidda iyo kahortaga maalgelinta argagixisada AML iyo Hindise Sharciyeedka Canshuurta Dakhliga, waxaana Baarlamaanka loo gudbiyay Heshiiska Iskaashiga Garsoorka Soomaaliya–Turkiga si loo eego.

**Fadhiga 6 aad (10 Maarso 2025):**

Waxaa mar kale la dhaariyey xildhibaan cusub. Waxaa la ansixiyey Hindise Sharciyeedka Caddaaladda Dhallinyarada iyo Hindise Sharciyeedka Canshuurta Dakhliga. Waxaa sidoo kale la soo gebogebeeyey akhrisyadii labaad ee Hindise Sharciyeedka Hay'adaha Maaliyadeed iyo Hindise Sharciyeedka Shirkadaha Caymiska.

**Fadhiga 7 ad (12 Maarso 2025):**

aWaxaa la meel mariyey Hindise Sharciyeedka ladagaalanka lacag dhaqidda iyo kahortaga maalgelinta argagixisada AML & CTF, Hindise Shacriyeedka Hay'adaha Maaliyadeed, iyo Hindise Sharciyeedka Shirkadaha Caymiska. Waxaa lagu arkay joogitaan ballaaran oo xildhibaanno ah iyo hab-maamul fadhiyeyaal oo hufan oo si xirfad leh loo maareeyay.

## 4. Caqabadaha la Aqoonsaday

Inkasta oo kalfadhigani uu lahaa guulo sharci-dejin oo muhiim ah, haddana Kooxda korjoogtada Golaha Shacabka BJFS waxay aqoonsadeen dhowr caqabadoo oo saameyn ku yeeshay habsami u socodka hawlaha Golaha Shacabka. Caqabadahan waxay muujinayaan meelaha u baahan in si gaar ah loo xoojiyo mustaqbalka.

- **Joogitaan Aan Joogto Ahayn oo Xildhibaannada Golaha Shacabka (MPs Attendance Irregularity):** Waxaa la arkay in joogitaanka xildhibaannadu uu ahaa mid aan degganayn. Joogitaan la'aantani waxay carqaladeyn kartaa horumarinta hawlaha sharci-dejinta waxayna hoos u dhigeysaa waxtarka doodaha iyo go'aan-qaadashada Baarlamaanka.
- **Isgaarsiinta Dibadda ee Xildhibaannada (External Communication by MPs):** Waxaa jiray xaalado ay xildhibaanno aragtidooda ugu gudbiyeen warbaahinta iyagoo qabanaya shirar jaraa'id oo ka baxsan xarunta ajandaha Golaha Shacabka. Inkasta oo xorriyadda hadalku muhiim tahay, haddana dhaqankan wuxuu dhaawici karaa doorka Baarlamaanka oo ah madasha ugu weyn ee doodaha sharci-dejinta.
- **Xaddidaadda Goobaha Warbaahinta (Media Space Constraints):** Goobta iyo agabka hadda loo qoondeeyey warbaahinta ayaa u muuqda kuwo aan ku filnayn in ay si buuxda u gutaan shaqadooda. Booska oo kooban wuxuu xannibi karaa daboolidda fadhiyada, taas oo muhiim u ah hufnaanta iyo helitaanka macluumaadka dadweynaha.
- **Xaddidaadda Helitaanka Hindise Sharciyeedyada (Limit of Public Access to Bills):** Muwaadiniinta iyo bulshada rayidka ayaa la kulmay dhibaatooyin weyn oo ku saabsan helitaanka Hindise Sharciyeedyada qabyada ah. Tani waxay si toos ah u xaddideysaa ka-qaybgalka dadweynaha iyo wacyiga ku dhisan xogta saxda ah.
- **Baahida La-tashiyo Ballaaran (Ensuring Broader Consultations):** Inkastoo bulshada rayidka ay door muhiim ah ka ciyaareen kormeerka, waxaa jira baahi loo qabo in la ballaariyo la-tashiyada ka baxsan gudaha Golaha Sharciyada si talooyinka kala duwan ee bulshada si wax ku ool ah loogu daro habka sharci-dejinta.
- **Joogteynta Hufnaanta iyo Ka-qaybgalka (Commitment to Transparency and Inclusivity):** Waa lama huraan in Golaha Shacabka uu sii adkeeyo ballanqaadka hufnaanta iyo ka-qaybgalka bulshada. Tani waxay abuureysaa jawi taageera nabad waarta, xasillooni, iyo maamul wanaagsan.
- **Xallinta Arrimaha Farsamo ee Sharciga (Addressing Technical Issues in Legislation):** Dib-u-dhigistii codbixinta Hindise Sharciyeedyada Caddaaladda Dhallinyarada ee ku timid arrimo farsamo waxay muujineysaa muhiimadda ay leedahay hubinta in shuruucdu si

farsamo ahaan u dhisan yihiin. Tani waa muhiim si loo gaaro hirgelin hufan iyo saameyn dhab ah.

## 5. Talooyin

Si kor loogu qaado waxtarka iyo hufnaanta Golaha Shacabka, korjoogtada Bulshada Rayidka waxay soo jeedinayaan talooyinka istaraatiijiga ah ee hoos ku xusan:

- **Xoojinta Kormeerka Joogitaanka:** In la hirgeliyo nidaam adag oo lagu kormeero laguna xakameeyo joogitaanka xildhibaannada fadhiyada Golaha Shacabka. Joogitaan joogto ahi wuxuu muhiim u yahay shaqada, hufnaanta iyo fulinta waajibaadka sharci-dejinta.
- **Dhiirrigelinta Isgaarsiinta Gudaha:** In xildhibaannada lagu dhiirrigeliyo inay Golaha ka dhigtaan madasha ugu weyn ee ay ku cabbiraan aragtidooda isla markaana uga qaybqaataan doodaha sharci-dejinta. Tani waxay xoojin doontaa doorka Baarlamaanka oo ah hay'adda dhexe ee doodaha sharciyeed waxayna ilaalin doontaa sharafta habraacyada.
- **Ballaarinta Goobaha Warbaahinta:** In la kordhiyo meelaha iyo agabka loogu talagalay warbaahinta si loo fududeeyo daboolista fadhiyada Golaha Shacabka. Taageeradaas waxay kor u qaadaysaa hufnaanta iyo helitaanka macluumaadka dadweynaha.
- **Fududeynta Helitaanka Hindise Sharciyeedyada Qabyada Ah:** In la abuuro kayd sharci oo online ah oo laga heli karo qoraallada qabyada ah ee shuruucda si degdeg ah, taas oo u oggolaaneysa shacabka inay dib u eegis iyo talo-bixin kusoo biiriyaan, laguna xoojiyo ka-qaybgalka dimuqraadiyadda ah.
- **Xoojinta Ka-Qaybgalka Bulshada Rayidka:** In la sii wado lana ballaariyo doorka CSOs ee geeddi-socodka Golaha Shacabka, si loo xaqiijiyo ka-qaybgal firfircoon oo ku saabsan doodaha, talo-bixinta, iyo dabagalka sharciyada.
- **Kordhinta Wacyigelinta Dadweynaha:** In loo hirgeliyo barnaamijyo lagu wargelinayo bulshada habraacyada Golaha Shacabka iyo shuruucda la ansixinayo, si loo kobciyo ka-qaybgalka madaniga ah iyo isla xisaabtanka.
- **Xoojinta Awoodda Sharci-dejinta:** In la siiyo Golaha Shacabka khayraad iyo tababaro lagu kobcinayo awooddooda farsamo iyo sharci-dejin, si loo hubiyo in sharcigu u diyaarsan yahay si wanaagsan oo uu uga jawaabo baahiyaha bulshada Soomaaliyeed.
- **Dhisidda Iskaashi Wadajir:** In la dhiirrigeliyo iskaashi iyo wadahadal joogto ah oo ka dhexeeya Golaha Shacabka, Bulshada Rayidka, laanta fulinta, iyo daneeyayaasha kale si loo helo aragti mideysan oo ku saabsan maamulka iyo horumarka qaranka.

## 6. Gabagabo

Kalfadhigii 6-aad ee Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya wuxuu ahaa mid lagu gaaray guulo sharci-dejin oo muhiim u ah maamulka iyo horumarka dhaqaale-bulsho ee dalka. Hawlaha kormeerka korjoogtada Bulshada Rayidka ee Golaha Shacabka ayaa door muuqda ka qaatay kor u qaadidda hufnaanta, isla xisaabtanka, iyo ka-qaybgalka bulshada ee geeddi-socodka howlaha Golaha Shacabka BJFS.

Horumar sii socda oo lagu sameeyo waxtarka habraacyada, tayada sharci-dejinta, iyo ka-qaybgalka muwaadiniinta ayaa muhiim u ah dhammaystirka dimuqraadiyadda iyo xoojinta dawladnimada Soomaaliya. Waa lama huraan in Golaha Shacabka uu tixgeliyo oo hirgeliyo talooyinkan si loo abuuro deegaan sharci-dejin oo ku saleysan ka–qaybgal ballaaran, hufnaan,, isla xisaabtan, iyo heerar adag oo maamul-dimoqraadiyadeed.

Tani waxay horseedi doontaa Baarlamaan u adeegaya shacabka Soomaaliyeed, kuna shaqeeya hannaan sharci-dejin oo hufan, waxtar leh, isla markaana xoojiya kalsoonida dadweynaha.[1]

[1] Warbixintan waxaa soo diyaarisay Kooxda Korjoogtada Bulshada Rayidka ah ee Golaha Shacabka Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, iyadoo hawshani ay qayb ka tahay Mashruuca **GOLE-KAAB** oo isku xira Golaha Shacabka iyo bulshada.

Office Address:

Road @KM5, Safari apartment @KM5,

Hodan District

**Mogadishu - Somalia**

Tel: +252-612008723

Email: info@golekaab.so , info@sonsaplatform.org

Web: https://golekaab.so/ , https://sonsaplatform.org/

Social Platforms: @GoleKaab @SONSA_NSA

i

[i] Warbxintaan waxaa laga soo aruuriyey Kalfadhiga 6-aad ee Golaha Shacabka ee Baarlamanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana soo diyaariyey Jilayaasha Aan Dowliga Ahayn ee Soomaaliyeed (SONSA), oo ku shaqeynaaya Kooxda korjoogtada Bulshada Rayidka ee Kormeerka Golaha Shacabka, iyada oo hawshani hoos timaadda Mashruuca **GOLE-KAAB.**